



Magaalada Seattle

Mabaadii'da Asturnaanta

Magaalada Seattle waxay ka ururisaa macluumaadka qof ahaaneed dadwaynaha si aanu u bixin karno adeegyo badan oo muhiim ah oo ay kujiraan ilaalinta bulshada iyo kaabayaasha muhiimka ah, jawaabta wicista 911, maaraynta khashinka, bixinta korontada iyo adeegyo kale.

Waxaanu ka shaqaynaa raadinta isku dheellitirnaan sax ah oo ka dhaxaysa ururinta macluumaadka si aanu u bixino adeegyada loo baahan yahay iyo ilaalinta asturnaanta dadwaynaha.

Inkastoo shuruucda asturnaantu ay ilaaliyaan macluumaadka qof ahaaneed qaarkood, macluumaadka aanu ururino waxay noqdaan diiwaan dawladeed kuwaasi oo dad kale waydiisan karaan inay arkaan iyaga oo u maraya codsiyada diiwaanada dadwaynaha. Haddaba, waxa kuu muhiim ah inaad ogaato goorta iyo sida macluumaadkaaga qof ahaaneed loo ururinayo, sida aanu u isticmaalayno, sida aanu u shaacinayno iyo muddada aanu haynayno.

Mabaadii'da Asturnaanta ee soo socda waxay hagayaan tallaabooyinka aanu qaadno marka aanu ururinayno oo aanu isticmaalayno macluumaadkaaga qof ahaaneed:

1

Qiime ayey noogu fadhidaa asturaantaadu...

Ku ilaalinta macluumaadkaaga qof ahaaneed asturanaan aad ayey muhiim u tahay. Waxaanu ka fekernaa halisaha ku iman kara asturnaantaada iyo fayyo-qabka dadwaynaha kahor ururinta, isticmaalka

2

Waxaanu ururinaa oo aanu haynaa marka aanu u baahannahay kaliya...

Kaliya waxaanu ururinaa macluumaadka aanu uga baahannahay bixinta adeegyada Magaalada waxaanannu haynaa ilaa inta sharci ahaan loo baahan yahay iyo si loo bixiyo adeegyadaas. Mar kasta oo ay

Sida aan u isticmaalno

3

macluumaadkaaga...

Marka ay suurogal tahay, waxaanu samaynaa macluumaadka jira wax kusaabsan qaababka aanu isticmaalayno macluumaadkaaga qof ahaaneed wakhtiga aanu ururinayno. Waxa naga soo dhacda inaanu

4

Annaga ayaa ka masuul ah...

Annaga ayaa ka masuul ah inaanu u maarayno macluumaadkaaga qof ahaaneed qaab waafaqsan ballanqaadyadayada iyo sida sharcigu dhigayo. Waanu ilaalinaa macluumaadkaaga qof ahaaneed annaga oo xaddidayna galaangal u yeelashada aan sharciga ahayn iyo annaga oo ka celinayna khawraadkayaga kaydka wixii halis ku ah

5

Sida aanu u wadaagno macluumaadkaaga...

Waxaanu raacnaa shuruucda fadaraalka iyo gobolka ee shaacinta macluumaadka mar kasta oo aanu la shaqaynayno hay'ado dawladeed oo dibadeed iyo ka jawaabista Codsiyada Shaacinta Dadwaynaha. Saaxiibada ganacsiga iyo iibiyayaasha heshiiska kujira ee hela ama ka qaata

Saxsanaantu waa muhiim...

Waxaanu ka shaqaynaa u joogtaynta iyo isticmaalka macluumaad qof ahaaneed oo sax ah ganacsiga Magaalada. Marka ay suurogal tahay, waxaanu ka shaqayn sixista macluumaadka qof ahaaneed ee khaldan. Sidoo kale waxaanu ku jihaynaa saaxiibadayada iyo iibiyayaasha

6